

**SLUG:** SY21 SEM2F

**TO:** All Families

**WHEN:** 4:30 p.m. Monday, Nov. 23

Ardayda iyo qoysaskoodu waxay u baahan yihiin inay hada go aansadaan oo ikhtiyaarkooda ku doortaan Qaabka Barashada ee ay doonayaan semesterka labaad ee bilaabanaya Febraayo 1, 2021.

Febraayo 1, 2021 ardaydu waxay bilaabi doonaan inay dib ugu noqdaan shaqsiyan barashada isku dhafan, iyagoo raacaya jadwalkayaga qiimeynta [gelinta isku xidhka shuruudaha gelitaanka] marka xogta COVID ogolaato. Tani waxay ka dhigan tahay in ardayda ku jirta **Barashada guriga/ fog ay bilaabi doonaan inay u gudbaan waxbarashada shakhsiga ah ee simistarka labaad. Qoysasku waxay u baahan yihiin inay doortaan mid ka mid ah xulashooyinka qaabka waxbarasho ee soo socda ee fasallada** simistarka labaad. Hadaadan dooran midna , ardaydu waxay u gudbayaan qaabkooda waxbarasho ee simistarka koowaad.

### **Ikhtiyaarka Qaabka Barashad 1: Barashada Fogaanta**

- Ardayda ka diiwaangashan Iskuulada udhow ama Signajar Iskuul isla markaana waxbarashada ku qaata ama ku dhigta gurigaku waxay asal ahaan ku hawlan yihiin fasaladeenii soo jireenka ahaa laakiin waxay ku wada samaynayaan dhammaan shaqooyinka fasalka guriga.
- Fasalladaan isla macallinka hada waxbaraya ayaa markii dib loogu noqdo iskuulada bari.
- Macallimiintu waxay dhigaan casharro maalinle ah waqtiyo cayiman, waxay raadraacaan sida wanaagsan ee ardaydu uqaadayaan manhajka iyo inay siiyaan taageero goorta iyo sida loogu baahan yahay.

- Ardaygu wuxuu la falgalaa oo la shaqeeyaa mid kasta

### **Xulashada Barashada Qaabka 2: Akadamiyada Farsamada**

- Ardayda KCVA waxay leeyihiin dabacsanaan ay kula dhaqmaan manhajka waqti kasta, maalin iyo habeen
- Ardayda KCVA waxay fursad u heli doonaan inay ka qaybgalaan nashaadaadka fasalka maalin kasta, sida jadwalkooda u oggolaado.
- Ardayda KCVA waxay leeyihiin barnaamij shaqsiyeed wax looga qabanayo
- Ardayda KCVA waxay leeyihiin tababare waxbarasho oo la shaqeeya qoysaska si ay u siiyaan taageero, cusbooneysiin, macluumaad, iyo warcelin joogto ah.
- Ardayda KCVA waxaa wax bara macallimiinta KCPS ee shahaadada haysta.
  - Ardayda KCVA waxaa loo oggolaan doonaa inay kaqeybqaataan waxqabadyada, isboortiga, iyo dhacdooyinka kale iyadoo loo marayo Iskuulladooda Xaafadda.

**Fadlan xulo mid ka mid ah qaababkan waxbarasho ee simistarka labaad illaa Diseembar 18, 2020.** Tani waxay noo oggolaan doontaa waqtiga aan u baahan nahay si aan u hubinno inaan si buuxda u shaqeyno oo aan u diyaargarowno inaan u adeegno ardayda. Fadlan booqo boggayaga internetka si aad u hesho macluumaad tusaalayn faahfaahsan oo wax ku ool ah: <https://www.kcpublicschools.org/reopening-kcps>

usuusin ahaan, waxaan si joogto ah ula soconaa xaalada cudurka faafa ee COVID-19 ee kajira xuduudaheena xaadirida iyo latalinta saraakiisha caafimaadka bulshada. Waxaan diyaarinay shuruudo adag oo ku saleysan sayniska iyo xogta taasoo hagi doonta go'aankeena aan ku bilaabayno ku soo celinta ardayda iskuulkeena. Ahmiyadeena ugu sareysa waa inaan ilaalino caafimaadka ardaydeena, qoysaska, shaqaalaha, booqdayaasha iyo xubnaha bulshada. Dashboardka heerka 'COVID-19' iyo sharuudaha qormooyinka waxaa laga daawan karaa degelkeenna: <https://www.kcpublicschools.org/reopening-kcps/dashboard> Waad ku mahadsan tahay wax kasta oo aad sameyso maalin kasta si aad uga caawiso ardaydeena inay guuleystaan. Sida had iyo jeer ah, hadafkeenu waa inaan ka caawinno arday kasta kordhinta guusha iyo abuurista khibrado aan caadi ahayn